

2023-24

Hordhaca Diiwaangelinta Koorsada Dugsiga Sare



Hagaha qorsheynta Dugsiyada
Dadweynaha Seattle ee loogu talagalay
ardayda dhigata dugsiga sare



Shaxda Mawduucyada

Farriin ka socota Kaaliyaha Kormeeraha Guud ee Tacliinta 2

Macluumaadka Meelaha Laga Xariirayo Dugsiga Sare 2

Shuruudaha Qalin Jabinta 3

Fasalka Qalin Jabinaya 2026..... 3

Qalin Jabinta Fasalka Diyaargarowga ee 2026 4

Fasalka Qalin Jabinaya 2021 ilaa 2025..... 5

Qalin Jabinta Fasalka Diyaargarowga ee 2021 ilaa 2025 6

Barashada Adeegga 7

Qorsheynta Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo 7

Qorsheynta Qeybaha Dugsiga Sare ee Shakhsi Ahaaneed
iyo Wixi Kadambeeyo 8

Fursadaha Kudarsashada Kiridhitka Labaad 9

Xaashida Shaqada ee ku Habboonaanshaha Xirfada 10

Xaashida Shaqada ee ku Habboonaanshaha Kulleejka 11

Koorsooyinka Dugsiga Dhexe ee loogu talagalay
Kiridhitka Dugsiga Sare..... 12

Kiridhitka Aqoonta Luuqadaha Adduunka 12

Xulashada Koorsada Dugsiga Sare ee Onlaynka ah..... 12

Isku Xigitaanka Casharada Koorsada ee Lagu Taliyey 12

Waxbarashada Xirfadda & Farsamada (CTE)..... 13

Faniga Luuqada Af-Ingiriisiga..... 14

Caafimaadka 15

Xisaabta..... 16

Barashada Jimicsiga Jirka 17

Sayniska 18

Cilmiga Bulshada 19

Bandhiga Fanka iyo Farshaxanka 20

Luuqadaha Adduunka 21

Farriin ka socota Kaaliyaha Kormeeraha Guud ee Tacliinta

Qalin Jabiyaha Sharafka leh ee **Mustaqbalka** ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle,

Waxyaabaha soo socdo waa hordhac ku saabsan nidaamka diiwaangelinta koorsada dugsiyada sare ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle ee sanad dugsiyeedka 2023-24. Waxaa loogu talagalay inay kaa caawiso sameynta go'aanno xog ogaal ah, oo waxbarasho oo aad ugu diyaargarobeyso mustaqbalkaaga iyo inay dhammeystir u noqdaan macluumaadka aad ka hesho dugsiyada sare.

Macalimiinteena iyo shaqaalaha waxa ay ku dadaalaan inay siyaan arday kasta khibrad adag oo macno leh inta ay barayaan xirfadaha ardayda u diyaarinaya xulashooyinka dugsiyada sare kadib. Hagitaanka kujira hordhacan wuxuu kuu oggolaanayaa inaad abuurto barnaamijka afarta sano ah ee sida ugu wanaagsan kuugu shaqeeyo. U isticmaal hagahan sidi kheyraad joogta ah inta aad isu diyaarinayso sannad dugsiyeedka xiga ee iyo wixii ka dambeeya.

Qorshahaaga waxbarasho iyo fasalada aad doorato in aad qaadata waa kuwo aad muhiim u ah. Qaado wakhti aad kaga fakarto xulashooyinkaaga. Xaqiiji inaad qaadata koorsooyin caqli ahaan kuu xujeynaya kuuna oggolaanaya inaad sahmiso xirfado iyo hibooyin cusub.

Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxa ay doonayaan in ardayda oo dhami ay helaan oo ay guul ka gaaraan koorsooyin adag, gaar ahaan koorsooyinka sare si ay uga qalin jabiyaan iyaga oo diyaar u ah fursadaha dugsiyada sare kadambeeya. Kuwaan waxaa kamid ah koorsooyinka Meeleynta Sare, Dugsiyada Caalamiga ah ee Sare, Kullejka Dugsiyada Sare, iyo barnaamijyada Waxbarashada Shaqada iyo Farsamada ee kiridhitka labaad. Degmadeenu waxa ay sameysay go'aan gaar ah oo lagu xaqiijinayo in ardaydeena ay ka sii durkaan caddaaladda waxbarashada ay fursad weyn u helaan barnaamijyadaan.

Waxaanu rajeyneynaa in dukumiintigani kaa caawin doono bixinta hagida guud ee dugsiyada sare ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle. Waxaa kujira soo koobida shuruudaha qalin jabinta, Qorshaha Dugsiyada Sare iyo Wixii Kadambeeya, iyo isku xigitaanka dhinaca casharada koorsada ee lagu taliyey.

Haddii aad qabto su'aalo kusaabsan koorsooyin gaar ah ama qorshahaaga afarta-sano ah, fadlan la xiriir macalin, lataliye, ama maamulaha jooga iskuulkaaga. Adiga ayey halkaas kuu joogaan. Inta aad isu diyaarinayso qorshe u sameynta sanadaha soo socda ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle, waxaanu kugu dhiirigelineynaa inaad tixgeliso qodobbada soo socda:

- U diyaargarowga kullejka iyo xirfada shaqada waxa uu bilaabmaa goorta hore ee bilaabida dugsiyada barbaarinta ubadka ee PreK waxa uuna sii socdaa ilaa dugsiyada sare oo fasalka 9aadna uu yahay sanad si gaar ah muhiim ugu ah.
- Saadaasha ugu wanaagsan ee guusha kulleejku waa dhammaystirka manhajka dugsiyada sare ee adag.
- Qiimee waxa aad rabto inaad sameyso, kadib qor qorshe aad rabto inaad ku gaarto yoolkaas.
- Goor hore bilow si aad u go'aamiso oo aad u baarto shuruudaha heerka gelitaanka ee kulleej ama xirfad shaqo oo gaar ah.
- Qorshee inaad naftaada xujeysa inta lagu jiro sannadkaaga u dambeeya.
- Hannaankan kala hadal qoyskaaga oona la wadaag yoolalka barnaamijkaaga dugsiyada sare. Xubnaha katirsan qoyskaaga waa shuraako muhiim u ah horumarinta Qorshahaaga Dugsiyada Sare & Wixii Kadambeeyo.

Waxaanu kuu rajeyneynaa guul adiga oo ka faa'iideysanaya fursadaha ugu badan ee laga heli karo Dugsiyada Dadweynaha Seattle.

Si daacad ah,

Dr. Keisha Scarlett
Kaaliyaha Kormeeraha Guud ee Tacliinta



Dugsiyada Sare

Wixii macluumaad dheeraad ah fadlan booqo
www.seattleschools.org/schools/

Alan T. Sugiyama High School

8601 Rainier Ave. S
Seattle, WA 98118
Xafiiska Guud: 206-252-6600

Nathan Hale High School

10750 30th Ave. NE
Seattle, WA 98125
Xafiiska Guud: 206-252-3680

Ballard High School

1418 NW 65th St.
Seattle, WA 98117
Xafiiska Guud: 206-252-1000

Nova

2410 E Cherry St.
Seattle, WA 98122
Xafiiska Guud: 206-252-3500

Chief Sealth International High School

2600 SW Thistle St.
Seattle, WA 98126
Xafiiska Guud: 206-252-8550

Rainier Beach High School

8815 Seward Park Ave. S
Seattle, WA 98118
Xafiiska Guud: 206-252-6350

Cleveland High School

5511 15th Ave. S
Seattle, WA 98108
Xafiiska Guud: 206-252-7800

Roosevelt High School

1410 NE 66th St.
Seattle, WA 98115
Xafiiska Guud: 206-252-4810

Franklin High School

3013 S Mt Baker Blvd.
Seattle, WA 98144
Xafiiska Guud: 206-252-6150

Seattle World School

1700 E Union St.
Seattle, WA 98122
Xafiiska Guud: 206-252-2200

Garfield High School

400 23rd Ave.
Seattle, WA 98122
Xafiiska Guud: 206-252-2270

Skills Center

2445 3rd Ave. S.
Seattle, WA 98134
Xafiiska Guud: 206-252-0730

Ingraham High School

1819 N 135th St.
Seattle, WA 98133
Xafiiska Guud: 206-252-3880

The Center School

305 Harrison St.
Seattle, WA 98109
Xafiiska Guud: 206-252-9850

Interagency Academy

3528 S Ferdinand St.
Seattle, WA 98118
Xafiiska Guud: 206-743-3930

West Seattle High School

3000 California Ave. SW
Seattle, WA 98116
Xafiiska Guud: 206-252-8800

Lincoln High School

4400 Interlake Ave. N
Seattle, WA 98103
Xafiiska Guud: 206-413-2500

Middle College

901 12TH Ave
Seattle 98122
Xafiiska Guud: 206-252-9900

Shuruudaha Qalin Jabinta

Ardayda kujirta Fasalka 2021 iyo wixi kadambeeya waa iney helaan 24 dhibcood si ay u qalin jabiyaan. Shuruudaha qalin jabinta ee cusub waxaa waajibiyey Guddiga Waxbarashada ee Gobolka Washington. Gudigu waxa uu ugu talagalay shuruudaha cusub inay noqdaan labadaba kuwa adag oo dabacsan iyo in lagu taageero himilada nidaamka waxbarashada oo dhammaan ardayda u diyaarinaya kulleejka, xirfada shaqada, iyo nololaha.

Fasalka Qalin Jabinaya 2026^a

Shuruudaha Koorsada ee 24-ka Kiridhit

Af-Ingiriisiga: 4 Kiridhit

- Hordhaca Suugaanta iyo Curiska 9, LGBTQIA Hordhaca Suugaanta iyo Curiska
- Suugaanta Adduunka iyo Curiska 10
- Suugaanta Mareykanka iyo Curiska 11, Daraasaadka Qowmiyaadka ama Suugaanta iyo Curiska LGBTQIA 11, Afrikaan, Eeshiyaan, Latinx, ama Suugaanta iyo Curiska ee Mareykanka Dhaladka 11, Luuqada AP, Suugaanta iyo Curiska IB 11, ama Af-Ingiriisiga Isla Bilaabida/ Kulleejka ee Dugsiga Sare (CIHS)
- Isbarbardhigga Suugaanta iyo Curiska 12, Luuqada iyo Curiska AP ama Suugaanta iyo Curiska AP, Luuqada iyo Curiska IB ee loogu talagalay fasalka 12aad, ama Af-Ingiriisiga Isla Bilaabida/Kulleejka ee Dugsiga Sare (CIHS)

Cilmiga Bulshada: 3 Kiridhit

- Taariikhda Adduunka 1
- Taariikhda Adduunka 2, Daraasaadka Qowmiyaadka Taariikhda Adduunka 2, Taariikhda Adduunka AP 1, ama Juqraafiga Aadanaha AP A
- Taariikhda Adduunka 3, Taariikhda Adduunka AP 2, ama Juqraafiga Aadanaha AP B
- Taariikhda Mareykanka, ama Daraasaadka Qowmiyaadka Taariikhda Mareykanka, Taariikhda Ameerika IB, Taariikhda Mareykanka AP, Daraasaadka Qowmiyaadka Mareykanka CIHS 151, ama CIHS 147 iyo 148, Daraasaadka Dadka Madow Taariikhda Adduunka 3, Taariikhda Adduunka LGBTQIA 3, Daraasaadka Dadka Madow, Filipinx, Latinx iyo Taariikhda Mareykanka
- Dowladda Mareykanka, IB Qarniga 20aad, ama AP Dowladda Mareykanka iyo Siyaasadda
- Taariikhda Gobolka Washington

Xisaabta: 3 Kiridhit

- Aljebra 1
- Joomitiri
- Aljebra 2, Xisaabta IB SL Sanadka 1, Aljebraha Dhaqaalaha, Baska CIHS 130, Xisaabta 107, Qaabeynta Adduunkeena, koorso aad u

horumarsan oo isku xigta xisaabta ah, ama koorsada xisaabta CTE ee la ansixiyay.

Sayniska: 3 Kiridhit

- Fiisikiska A/Kimistiriga A
- Baayoloji
- Fiisikiska B/Kimistiriga B ama ka dooro koorsada la bixiyo ee aasaasiga ah ee la oggolaaday ama koorsooyinka u dhigma ee OSPI-ansixisay ee waxbarashada shaqada iyo farsamada (CTE).

Career Connected Learning (Xirfadda Barashada Ku Xiran, CTE): 1 Kiridhit

- Ka dooro koorsooyinka la bixiyo ee la oggolaaday.

Caafimaadka: 0.5 Kiridhit

- 0.5 Caafimaadka ama Caafimaadka Qoyska

Barashada Jimicsiga Jirka: 1.5 Kiridhit

- Ku Habboonaanshaha Shakhsi Ahaaneed
- Ka dooro koorsooyinka la bixiyo ee la oggolaaday

Bandhiga Fanka iyo Farshaxanka: 1 ilaa 2 Kiridhit

- Ka dooro koorsooyinka la bixiyo ee la oggolaaday.

Koorsooyinka Diyaargarowga ee Shakhsi Ahaaneed (Luuqadda Adduunka, Fanka, Sayniska, iwm.): 2 ilaa 3 Kiridhit

- Ka dooro koorsooyinka la bixiyo ee la oggolaaday.

Ikhtiyaarada: 4 Kiridhit

- Koorso kasta oo aan ka ahayn koorsooyinka kor lagu soo sheegay.

Wadarta: 24 Kiridhit

^a Fadlan la soco in shuruudaha qalin jabinta ee Fasalka 2027 wali la soo gabagabeynayo laakiin la filayo inay aad ugu ekaadaan kuwa Fasalka 2026. Macluumaadkiyo faahfaahinadi ugu dambeeyay ee ku saabsan shuruudaha qalin jabinta SPS, fadlan gal: <https://www.seattleschools.org/academics/high-school-college-career/graduation-requirements>

Qalin Jabinta Diyaargarowga Fasalka 2026^b

Ardaydu waa inay dhammeystiraan ugu yaraan hal Qalin Jabin oo Diyaargarowga ah laakiin waxaa lagu dhiirigelinayaa inay dhammaystiraan inta ugu badan ee la jaan qaadi kara shaqadooda iyo yoolalka waxbarasho.

ELA + Diyaargarowga Xisaabta	Diyaargarowga Shaqada & Farsamada	U Diyaargarowga Xirfadaha Adeegga Ciidanka Xooga (ASVAB)
Gaarsii isku-darki kasta ee ah ugu yaraan hal ELA iyo hal ikhtiyaar oo xisaab ah ee ikhtiyaaradaas liistada ku taxan	2.0 Kiridhityada halka Aag ee Barnaamijka CTE	Qaado Xirfadaha Adeegga Ciidanka Xooga oo leh Darajada 31 ama ka badan
<i>Ikhtiyaarada Af-Ingiriisiga</i>	Sayniska Beeraha, Ganacsiga iyo Suuqgeynta, Qoyska iyo Sayniska Macmiilka, Sayniska Caafimaadka, Sayniska Xirfada iyo Farsamada, STEM	
Buundada SBA ELA(2548) ama WA-AIM(104) ama SAT(410) ama ACT (14) ama		
Isla Bilaabida – Af-Ingiriisiga ama CIHS – Af-Ingiriisiga ama Af-Ingiriisiga Lagu Tagayo Kulleejka oo leh darajada D ama kabadan ama		
1 kiridhit mid ka mid ah kuwan soo socda: Luuqada iyo Curiska AP Dhaqaalaha AP Cilmi-nafsiga AP Taariikhda Mareykanka AP Taariikhda Adduunka AP Dowladda Mareykanka iyo Siyaasadda AP Xukuumadda iyo Siyaasadda AP ama Shakhsiyaadka iyo Bulshada IB ama Luqadda Af-Ingiriisiga IB/Koorsooyinka suugaanta oo leh darajada C+ ama ka badan (ama leh dhibcaha uqalmaya Imtixaanka AP/IB)		
<i>Ikhtiyaarada Xisaabta</i>		
Buundada SBA Xisaabta(2595) ama WA-AIM(103) ama SAT(430) ama ACT (16) ama		
Isla Bilaabida – Xisaabta ama CIHS – Xisaabta ama Xisaabta Lagu Tagayo Kulleejka oo leh darajada D ama kabadan ama		
1.0 kiridhit mid ka mid ah kuwan soo socda: Tirakoobka AP Sayniska Kombiyuutarka AP A Mabaadii'da Sayniska Kombiyuutarka AP Kalkulaaska AP Kooras kasta oo Xisaab IB ah oo leh darajada C+ ama ka badan (ama leh dhibcaha uqalmaya Imtixaanka AP/IB)		

Furaha:

- SBA = Imtixaanka Dheellitiran ee Smarter (imtixaanka dhamaadka-sanadka ee Xisaabta iyo Faniga Luqadda Af-Ingiriisiga ee uu u baahan yahay Gobolka Washington)
- WA-AIM = Helitaanka Washington ee Waxbaridda & Cabbiraadda (imtixaan kale oo ku saleysan heerarka guusha ee kale ee la waafajiyay Heerarka Gobolka Aasaasiga ee Guud oo loogu talagalay ardayda sida weyn naafada uga ah garaadka)
- SAT waagi hore u taagneyd "Imtixaanka Kartida Aqoonta" (imtixaanka heerka gelitaanka kulleejka oo cabiraya akhris-qoraalka ardayga, xisaabta, iyo xirfadaha wax qorista)
- AP = Meeleynta Sare
- IB = Dugsiga Caalamiga ah
- CIHS = Kulleejka Dugsiga Sare dhexdiisa
- STEM = Sayniska, Tignoolajiyada, Injineerinka, Xisaabta

^b Fadlan la soco in shuruudaha qalin jabinta ee Fasalka 2027 wali la soo gabagabeynayo laakiin la filayo inay aad ugu ekaadaan kuwa Fasalka 2026. Macluumaadki iyo faahfaahinadi ugu dambeeyay ee ku saabsan shuruudaha qalin jabinta SPS, fadlan gal: <https://www.seattleschools.org/academics/high-school-college-career/graduation-requirements>

Fasalka Qalin Jabinaya 2021 ilaa 2025

Shuruudaha Koorsada ee 24-ka Kiridhit

Af-Ingiriisiga: 4 Kiridhit

- Hordhaca Suugaanta iyo Curiska 9, LGBTQIA Hordhaca Suugaanta iyo Curiska
- Suugaanta Adduunka iyo Curiska 10
- Suugaanta Mareykanka iyo Curiska 11, Daraasaadka Qowmiyaadka ama Suugaanta iyo Curiska LGBTQIA 11, Afrikaan, Eeshiyaan, Latinx, ama Suugaanta iyo Curiska ee Mareykanka Dhaladka 11, Luuqada AP, Suugaanta iyo Curiska IB 11, ama Af-Ingiriisiga Isla Bilaabida/Kulleejka ee Dugsiga Sare (CIHS)
- Isbarbardhigga Suugaanta iyo Curiska 12, Luuqada iyo Curiska AP ama Suugaanta iyo Curiska AP, Luuqada iyo Curiska IB ee loogu talagalay fasalka 12aad, ama Af-Ingiriisiga Isla Bilaabida/Kulleejka ee Dugsiga Sare (CIHS)

Cilmiga Bulshada: 3 Kiridhit

- Taariikhda Adduunka 1
- Taariikhda Adduunka 2, Daraasaadka Qowmiyaadka Taariikhda Adduunka 2, Taariikhda Adduunka AP 1, ama Juqraafiga Aadanaha AP A
- Taariikhda Adduunka 3, Taariikhda Adduunka AP 2, ama Juqraafiga Aadanaha AP B
- Taariikhda Mareykanka, ama Daraasaadka Qowmiyaadka Taariikhda Mareykanka, Taariikhda Ameerika IB, Taariikhda Mareykanka AP, CIHS AES 151, ama CIHS 147 iyo 148, Daraasaadka Dadka Madaw Taariikhda Adduunka 3, Taariikhda Adduunka LGBTQIA 3, Daraasaadka Dadka Madaw, Filipinx, Latinx iyo Taariikhda Mareykanka
- Dowladda Mareykanka, IB Qarniga 20aad, ama AP Dowladda Mareykanka iyo Siyaasadda
- Taariikhda Gobolka Washington

Xisaabta: 3 Kiridhit

- Aljebra 1
- Joomitiri
- Aljebra 2, Xisaabta IB SL Sanadka 1, Aljebraha Dhaqaalaha, Baska CIHS 130, Qaabeynta Adduunkeena ama koorso aad u horumarsan oo isku xigta ama koorsada xisaabta CTE ee la ansixiyay.

Sayniska: 3 Kiridhit

- Fiisikiska A/Kimistiriga A
- Baayoloji
- Fiisikiska B/Kimistiriga B ama ka dooro koorsada la bixiyo ee aasaasiga ah ee la oggolaaday ama koorsooyinka u dhigma ee OSPI-ansixisay ee waxbarashada shaqada iyo farsamada (CTE).

Career Connected Learning (Xirfadda Barashada Ku Xiran, CTE): 1 Kiridhit

- Ka dooro koorsooyinka la bixiyo ee la oggolaaday.

Caafimaadka: 0.5 Kiridhit

- 0.5 Caafimaadka ama Caafimaadka Qoyska

Barashada Jimicsiga Jirka: 1.5 Kiridhit

- Ka dooro koorsooyinka la bixiyo ee la oggolaaday

Bandhiga Fanka iyo Farshaxanka: 1 ilaa 2 Kiridhit

- Ka dooro koorsooyinka la bixiyo ee la oggolaaday.

Koorsooyinka Diyaargarowga ee Shakhsi Ahaaneed (Luuqadda Adduunka, Fanka, Sayniska, iwm.): 2 ilaa 3 Kiridhit

- Ka dooro koorsooyinka la bixiyo ee la oggolaaday.

Ikhtiyaarada: 4 Kiridhit

- Koorso kasta oo aan ka ahayn koorsooyinka kor lagu soo sheegay.

Wadarta: 24 Kiridhit

Diyaargarowga Qalin Jabinta Fasalka 2021 ilaa 2025

Ardaydu waa inay dhammeystiraan ugu yaraan hal Qalin Jabin oo Diyaargarowga ah laakiin waxaa lagu dhiirigelinayaa inay dhammaystiraan inta ugu badan ee la jaan qaadi kara shaqadooda iyo yoolalka waxbarasho.

ELA + Diyaargarowga Xisaabta
Gaarsii isku-darki kasta ee ah ugu yaraan hal ELA iyo hal ikhtiyaar oo xisaab ah ee ikhtiyaaradaas liistada ku taxan
Ikhtiyaarada Af-Ingiriisiga
Buundada SBA ELA(2548) ama WA-AIM(104) ama SAT(410) ama ACT (14) ama
Isla Bilaabida – Af-Ingiriisiga ama CIHS – Af-Ingiriisiga ama Af-Ingiriisiga Lagu Tagayo Kulleejka oo leh darajada D ama kabadan ama
1 kiridhit mid ka mid ah kuwan soo socda: Luuqada iyo Curiska AP Dhaqaalaha AP Cilmi-nafsiga AP Taariikhda Mareykanka AP Taariikhda Adduunka AP Dowladda Mareykanka iyo Siyaasadda AP Xukuumadda iyo Siyaasadda AP ama Shakhsiyadka iyo Bulshada IB ama Luqadda Af-Ingiriisiga IB/Koorsooyinka suugaanta oo leh darajada C+ ama ka badan (ama leh dhibcaha uqalmaya Imtixaanka AP/IB)
Ikhtiyaarada Xisaabta
Buundada SBA Xisaabta(2595) ama WA-AIM(103) ama SAT(430) ama ACT (16) ama
Isla Bilaabida – Xisaabta ama CIHS –Xisaabta ama Xisaabta Lagu Tagayo Kulleejka oo leh darajada D ama kabadan ama
1.0 kiridhit mid ka mid ah kuwan soo socda: Tirakoobka AP Sayniska Kombiyuutarka AP A Mabaadii'da Sayniska Kombiyuutarka AP Kalkulaaska AP Kooras kasta oo Xisaab IB ah oo leh darajada C+ ama ka badan (ama leh dhibcaha uqalmaya Imtixaanka AP/IB)
<i>Ardayda kujirta fasalka 2021 waa fasalka ugu dambeeya ee isticmaala Shahaadada Guusha Shakhsiga ee ikhtiyaarka ELA/Xisaabta</i>

Diyaargarowga Shaqada & Farsamada
2.0 Kiridhityada halka Aag ee Barnaamijka CTE
Sayniska Beeraha, Ganacsiga iyo Suuqgeynta, Qoyska iyo Sayniska Macmiilka, Sayniska Caafimaadka, Sayniska Xirfada iyo Farsamada, STEM

U Diyaargarowga Xirfadaha Adeegga Ciidanka Xooga (ASVAB)
Qaado Xirfadaha Adeegga Ciidanka Xooga oo leh Darajada 31 ama ka badan

Furaha:

- SBA = Imtixaanka Dheellitiran ee Smarter (imtixaanka dhamaadka-sanadka ee Xisaabta iyo Faniga Luqadda Af-Ingiriisiga ee uu u baahan yahay Gobolka Washington)
- WA-AIM = Helitaanka Washington ee Waxbaridda & Cabbiraadda (imtixaan kale oo ku saleysan heerarka guusha ee kale ee la waafajiyay Heerarka Gobolka Aasaasiga ee Guud oo loogu talagalay ardayda sida weyn naafada uga ah garaadka)
- SAT waagi hore u taagneyd "Imtixaanka Kartida Aqoonta" (imtixaanka heerka gelitaanka kulleejka oo cabiraya akhris-qoraalka ardayga, xisaabta, iyo xirfadaha wax qorista)
- AP = Meeleynta Sare
- IB = Dugsiga Caalamiga ah
- CIHS = Kulleejka Dugsiga Sare dhexdiisa
- STEM = Sayniska, Tignoolajiyada, Injineerinka, Xisaabta

Barashada Adeegga

Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxa ay ardayda kaga baahan yihiin inay dhammeystiraan 60 saacadood oo adeeg barashada ah kahor inta aysan qalin jabin.

Barashada adeegga dhexdeeda, ardaydu waxa ay xirfadahooda waxbarasho iyo aqoontooda ku dabaqaan goobaha nololaha dhabta ah. Dugsiyada si gaar ah ugala xariir si aad uga hesho macluumaad gaar ah.

Qorsheynta Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo

Helitaanka xirfad shaqo ma ahan meel loo socdo; ee waa safar.

Safarkani wuxuu kuxiran yahay xirfadaha kaa caawin doona inaad sahmisno nololaha oo aad go'aanno xog ogaal ah ka gaarto inta aad dhiseyso xirfadaha tacliinta iyo nololaha.

Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo waa khariiradda yoolalkaaga mustaqbalka. Hagahani qorsheynta waxa uu ku saabsan yahay macno u sameynta dhammaan qeybaha kala duwan ee qeybta ka ah go'aanada kusaabsan mustaqbalkaaga. Waxa uu u qaabeysan yahay inuu kaa caawiyo sidii aad u abuuri lahayd una cusbooneysiin lahayd qorshahaaga. Waxa uu la jaan qaadayaa casharrada aad ku qaadan doonto fasalka adiga oo adeegsanaya Naviance.

Dhaqanka u diyaarsanaanta kulleejka iyo xirfada shaqada waxaa kamid ah is-fahmida, sahmintada xirfada shaqada, horumarinta xirfadda, iyo qorsheynta xirfada shaqada.

1) Is-fahmida

Marka koowaad: ogow adiga naftaada, danahaaga, iyo awoodahaaga.

Aqoonta ka raadi bulshadaada iyo qoyskaaga, awoodahaaga wadajirka ah, iyo xigmadda la wadaago. Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo waxa uu adeegsadaa aalado waxyaabahaas waafajinaya xirfadaha shaqooyinka. Waxaa laga yaabaa inaad kahesho wax lama filaan ah.

2) Sahmintada Xirfada Shaqada

Barashada iyo la kulanka shaqooyinka kala duwan waxa ay muhiim u tahay in la gaaro go'aanno xog ogaal ah. Sahmintada waxa ay ku saabsan tahay aragtida danaha kala duwan, xirfadaha, iyo qiimayaal kujira xulashooyin badan.

Sidee danahaaga iyo xirfaddaadu ugu xiran yihiin xulashooyinka koorsadeena? Xirfado nooc ee ah ayey dadku u baahan yihiin in looga shaqaaleeyo shaqooyin kala duwan? Sidee ayaad ku aqoonsaneyso tababarka loo baahan yahay si loo gaaro shaqooyinkaas?

3) Horumarinta Xirfadda

Dejinta Hadafka, xallinta dhibaataada, go'aan qaadashada, iyo adkeysiga ayaa ah tusaalooyinka xirfadaha looga baahan yahay fasalka, shaqada, iyo guusha nololaha. Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo waxa uu ka caawiyaa ardayda inay horumariyaan xirfadahaan. Ardaydu sidoo kale waxa ay bartaan xirfadaha risiyuumka codsiga shaqada iyo wax badan oo ka caawinaya iney guul ka gaaraan shaqada adduunka.

4) Qorsheynta Xirfada Shaqada

Waxaad horumarin doontaa aragtiyo waxaadna horumarin doontaa xirfado aad ku raadsato shaqooyinka, dhista risiyuumka codsiga shaqada, qorsheynta kulleejka, qorsheynta kharashka kulleejka (kaalmada dhaqaale), ku habboonaanshaha kulleejka iyo xirfada shaqada, iyo kuwa kale oo badan.

U diyaarsanaanta kulleejka iyo xirfada shaqada waxa ay ku saabsan yihiin adeegsiga tacliinta, shucuurta bulshada, iyo xirfadaha shaqo ee nololaha iyo shaqada adduunka. Waxa aad sidoo kale wax kaban doontaa caadooyinka shaqada, barashada adeegga, iyo kobaca shaqada.

U diyaar ahaanshaha kulleejka waa hal tallaabo oo loo qaaday hannaanka u diyaarsanaanta xirfada ee xirfadooyinka badan.

Qorshahaaga waa aalad **iy**o hannaan aad u isticmaaleysid inaad ku qeexo yoolalkaaga xirfadaha shaqada iyo sameynta go'aano xog ogaal ah.

Hannaanku waxa uu kusaabsan yahay baarista danahaaga iyo awoodahaaga aad ku baareyso yoolalkaaga. Intaa kadib waxa aad dib u qiimeyn doontaa inta aad wax badan ka baraneyso naftaada iyo ikhtiyaarahaaga shaqo.

Tani waxa ay ku saabsan tahay taageerida adiga; qoyskaaga iyo odayaashaada; qeexida iyo kobcinta yoolalkaaga inta aad kusii jirto safarkaaga.

Hagaha qorsheyntani waxaa loo sii kala qeybiyaa saddex qeybood: Qorsheynta Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo, Koorsooyinka La Bixiyo, iyo Xirfada Barashada Ku Xiran.

Qorsheynta Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo

Fasalka 6aad – 12aad, waxa aad ka qeyb qaadan doontaa horumarinta Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo adiga oo dajinaya yoolal, dano qaadasho iyo agabka shaqada, abuuraya qorshaha koorso 4 sano ah oo dugsi sare ka dib oo gaar ah si aad u gaarto yoolalkaaga shakhsi ahaaneed.

Waxaad kaqeybqaadan doontaa casharrada fasalka, waxaad adeegsan doontaa Naviance, ka qeyb geli doontaa munaasabadaha oo aad la kulmi doontaa lataliyayaasha dugsiga, lataliyayaasha, daryeelayaasha, odayaasha, ama dadka waaweyn ee aaminka ah si ay u naqshadeeyaan oo u cusboonaysiiyaan qorshayaashaada sannad kasta.

Bixinta Koorsooyinka

Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxa ay leeyihiin koorsooyin badan oo ay bixiyaan. Hagahani waxa uu bixinayaa macluumaad ku saabsan qaar badan oo ka mid ah koorsooyinka aasaasiga ah ee aan bixinno kuwaas oo la jaan qaada shuruudaha qalin jabinta laakiin kuma wada jiraan dhammaan koorsooyinka SPS.

Koorso kastaa waxa ay lahaan doontaa qeexitaan iyo shuruudaha, tirada kiridhityada aad kasban karto, iyo qoraal koorsooyinka loogu xisaabiyo kiridhitka labaad ama shuruuda Qalin jabinta Diyaargarowga ah.

Xirfadda Barashada Ku Xiran

Xirfadda Barashada Ku Xiran waxa ay shaqada adduunka ku xirtaa fasalka.

Tusaalooyinka waxaa ka mid ah booqashooyinka goobta shaqada, khudbadaha marti-sharafta xirfada shaqada, lataliyayaal shaqo, tababar shaqo barasho, tababar-barasho, rugaha daryeelka caafimaadka, ka shaqeynta dukaan dugsiga, iyo mashaariicda adeegga ee la xiriira koorsada. Fursadahaani waxa ay kuu ogolaanayaan inaad la falgasho xirfadleyda goobaha shaqada. Waxa ay kaa caawin karaan inaad sahmisoo oo aad u diyaargarowdo xirfad u dhiganta awoodahaaga iyo danahaaga.

Qeybaha Qorshaha

- Aqoonsiga yool xirfad
 - Qiimeynta daneynta iyo Xirfadaha
- Aqoonsiga yoolalka waxbarashada iyo xirfada
 - Cilmi baarista yoolka shaqada iyo waxa ay ku qaadaneysa in halkaa la gaaro
 - Ikhtiyaarada barnaamijka xirfadeed/farsamo, ikhtiyaarada shahaadada heerka koowaad ee 2-sano, ikhtiyaarada shahaadada heerka koowaad ee 4-sano, tababarka xirfada, tababarada shaqada, militariga, ama tababar kale oo waxbarasho
 - Go'aaminta ku habboon barnaamijka dugsiga sare kadib si aad u gaarto yoolkaaga shaqo
 - Barnaamijku miyuu bixiyaa koorsooyinka, shahaadooyinka, shahaadooyinka heerka koowaad ee loo baahan yahay? Oo ay ku jiraan tixgelino kale.
- Go'aaminta qorshaha koorsada 4 sano ah ee la cusboonaysiin karo sannad kasta
 - Wax kaqabashada shuruudaha qalin jabinta iyo shuruudaha ku biirista dugsiga sare kadib
 - Barashada ku saleysan shaqada, hoosaska shaqada, tababarada shaqo barashadam barashada Adeegga
- Risuyuumka ama warbixinta hawsha
- Ardayda aanan buuxin heerarka qalin jabinta dugsiga sare, waxay aqoonsadaan wax ka qabashooyinka la heli karo, taageerooyinka waxbarasho, iyo koorsooyinka

Qorsheynta Qeybaha Dugsiga Sare ee Shakhsi Ahaaneed iyo Wixi Kadambeeyo

Qorshahaagu waa inuu ka tarjumadaa **yoolalkaaga**.

Habka loo abuurayo qorshahaagu waxa uu gacan kageystaa horumarinta xirfado aad adeegsan karto waqti kasta oo aad rabto inaad isbeddel ku sameyso koorsooyinka, yoolalka mustaqbalka, shaqada, iyo in kale oo badan.

Doorashada xirfad ma ahan wax kasta, kaliya waa hal qeyb oo mustaqbalkaaga ah. Had iyo jeer waxaa jira isxilqaan, diin, beel, waxqabad, iyo fursado kale. Diirada qorshahan ayaa ah in lagaa caawiyo inaad

sameysato hadaf shaqo; hase yeeshee, ma rabno inaan ilaawin ama iska indho tirno inay jiraan habab badan oo lagu helo danahaaga, iyo siyaabo loogu doodo laguna xuso bulshadaada ka baxsan adduunka shaqada.

Waxaanu diiradda saari doonnaa qeybaha soo socda si aan kaaga caawino inaad gaarto go'aannadaada dugsiga sare ka dib:

Is-fahmida

- Maxaan jeclahay?
- Maxaa i xiisa galiya?
- Waa maxay awoodahayga?

Waa maxay waxa aan rabo?

- Fasalo noocaa ah ayaa buuxinaya shuruudaha qalin jabinta iyo hadafkeyga shaqo?
- Waa maxay shaqooyinka aan xiiseynayo?
- Maxaan rabaa inay noqdaan koorsooyinkega diyaargarowga?
- Waa maxay shahaadada ama dhigriiga aan u baahanahay inaan ku gaaro yoolalkeyga xirfada shaqada?

Sideen ku tagi karaa halkaas?

- Waa maxay Kulleeyada ama tababarada leh barnaamijka aan doonayo?
- Si sax ah ma iigu habboon tahay? Ma dugsiga weyn baa mise mid yar?
- Guriga ma u dhow yahay mise wuu ka fog yahay? Miyuu magaalada u dhow yahay mise wuu ka fog yahay?
- Waa maxay fasalada aan u baahanahay inaan galo?
- Waa maxay khibradaha ku xiran shaqada ama barashada adeegga ee i siin doona xirfadaha aan u baahanahay?
- Waa maxay aqoonsiyada aan u baahanahay?
- Meeqa ayuu joogaa qiimaha?
- Miyaan u qalmi doonaa kaalmada dhaqaale? Ka waran faa'iidada deeqaha waxbarasho?
- Ma u baahnaan doonaa inaan qaato amaahda ardaydeena?

Sixitaano Sameynta

- Nolasha waxaan mararka qaarkood u baahan nahay inaan sameyno isbeddelo marka aanu baranno waxyaabo cusub oo ku saabsan nafta, shaqooyinkeenna, ama qorshayaasheena. Sanad kasta inta aad ka shaqeyneyso qorshahaaga waxaad had iyo jeer ku sameyn kartaa isbeddelo.
- Cusbooneysi diyaargarowgaaga ama qorshaha koorsada 4-ta sano
- Beddel yoolalkaaga shakhsi ahaaneed
- Ka hel taageero iyo jawaab celin waalidkaaga/ daryeelahaaga/ qof kaaweyn ama lataliyaha iskuulka

Fursadaha Kudarsashada Kiridhitka Labaad

Ardaydu waxa ay haystaan dhowr siyaabood oo ay halmar ku kasbadaan kiridhitka dugsigu sare iyo kulleejka. Ardaydu waxa ay iska diiwaangelin karaan Kiridhitka Labaad ee CTE, Kulleejka Dugsiga Sare dhexdiisa ah, Isla Bilaabida, Meeleynta Sare®, ama koorsooyinka Dugsiga Caalamiga.

Qoysasku waa inay ogaadaan in kulleejooyinka iyo jaamacadaha ay qiimeyn doonaan oo ay ula dhaqmi doonaan mid kasta oo ka mid ah fursadaha kiridhitka labaad iyaga oo kusaleynaya tilmaamahooda gudaha. Wixi su'aala ah oo kusaabsan wareejinta kiridhitka labaad fadlan kala xariir kulleejka ama jaamacada aad daneeyneyso.

Cilmi baaris ayaa muujineysa in ardayda qaata ugu yaraan hal koorso oo kiridhitka labaad ah ay u badan tahay inay si dhakhsa ah ku dhammeeyaan shahaadadooda dhigriiga ee 4-ta sano; waxa ay u badan tahay inay helaan "B" ama ka badan ee koorsooyinka kulleejka waxayna u badan tahay inay keensadaan dhibcaha imtixaanka gelitaanka kulleejka oo badan.

Dugsigi sare ee kasta ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxa uu leeyahay ugu yaraan hal ikhtiyaar oo kiridhitka labaad ah.

Meeleynta Sare

Waxyaabaha ay ka kooban yihiin, sida ay u socdaan, iyo natiijooyinka waxaa soo saaray Guddiga Kulleejka oo loogu diyaarinayo imtixaanka AP ee dhamaadka koorisada. Si loo kasbado kiridhitka kulleejka, ardaydu waa inay ku dhammaystiraan imtixaannada dhibco gaar ah; aqbalitaanka dhibcaha waxaa go'aamiya kulleej kasta ama jaamacad kasta. Kulleejyada iyo jaamacadaha qaarkood waxaa laga yaabaa inay xadidan yihiin tirada kiridhityada AP ee ay aqbalayaan. Waxaa jira khidmado laga qaado imtixaanka, hase yeeshee, ardayda uqalma Qadada Bilaashka ah ama Qiimaha Jaban waxa ay xaq u yeelan karaan in laga dhafo khidmadaha imtixaanka. Kala xariir iskuduwaha imtixaanka iskuulkaaga wixi faahfaahino ah.

Dugsiga Caalamiga ah

Qaab dhismeedka koorisada IB waxaa soo saara Dugsiga Caalamiga ah (IB).

Koorsooyinka IB waxaa loo qaadan karaa kiridhitka kulleejka iyada oo lagu baasayo imtixaanka dhammaadka koorisada ama koorsooyinka waa la isla qaadan karaa si loo helo dhibloomada IB ama shahaadada xirfada IB. Kiridhitka kulleejka waxaa qoondeeya kulleejka ama jaamacada.

Dhammeystirka dhibloomada IB waxa ay ardayda u kasbi kartaa lambar weyn oo ah kiridhitka kulleejka. Kulleejyada qaarkood waxaa laga yaabaa inay xadidan yihiin tirada kiridhityada ee ay aqbalayaan. Waxaa jira khidmado laga qaado imtixaanka, hase yeeshee, ardayda uqalma Qadada Bilaashka ah ama Qiimaha Jaban waxa ay xaq u yeelan karaan in laga dhafo khidmadaha imtixaanka. Kala xariir iskuduwaha imtixaanka iskuulkaaga wixi faahfaahino ah.

Kulleejka Dugsiga Sare dhexdiisa

Kulleejka Dugsiga Sare dhexdiisa (CIHS) waa barnaamij gobolka Washington ah oo u oggolaanaya iskuulada inay iskaashi la yeeshaan kulleejooyinka maxalliga ah si ay koorsooyin kulleej uga bixiyaan dugsigu sare.

Koorsooyinka waxaa lagu qaataa labadaba kiridhitka dugsigu sare iyo kulleejka. Ardaydu waxa ay qaadan doonaan laba waraaq oo natiijo, mid ka socota kulleejka iyo mid ka socota dugsigu sare. Khidmadaha kulleejka ayaa khuseeya, si loo qaato kiridhitka kulleejka ardaydu waa inay bixiyaan khidmada kiridhitka kulleejka. Khidmaduhu waa ay ku kala duwan yihiin iyagoo ku xiran kulleejka shuraakada.

Dugsiyadu waa inay lahaadaan tirada ugu yar ee ardayda wax bixineysa si loo bixiyo kiridhitka koorisada. Ardayda qaata koorisada oo aanan bixin khidmada kiridhitka kulleejka waxa ay weli helayaan dhibcaha Kulleejka Dugsiga Sare dhexdiisa oo ugu qoran waraaqdooda natiijada.

Kiridhitka Labadaad ee CTE

Barnaamijka Kiridhitka Labadaad ee Waxbarashada Shaqada iyo Farsamada (CTE) waxa uu u oggolaanayaa ardayda dugsigu sare inay helaan kiridhitka kulleejka ee dhameystirka koorsooyinka CTE ee dugsiyada sare ee kaqeybgalaya.

Kiridhitka Labadaad ee CTE waa iskaashi warshadeed iyo waxbarasho oo ka go'an bixinta shaqaale aad u tababaran oo dhiirran, oo diyaar u ah iney sii wadaan barashada noloshu oo dhan ee bulshada tikniyoolajiyada ee isbedbedeysa. Kiridhitka Labadaad ee CTE waxaa kamid ah koorso adag oo diiradda lagu saarayo waxbarashada oo ardayda siineysa aasaasyada waxbarasho iyo farsamo ee muhiimka ah ee ardayda u diyaarinaya xirfadaha goobta shaqada ee lagama maarmaanka ah.

Isla Bilaabida

Fursad gobolka oo dhan ah oo loogu talagalay dhammaan ardayda fasalada hore iyo kuwa dhammeynaya dugsigu sare ee gobolka Washington. Ardaydu waxa ay koorsooyinka iska diiwaangeliyaan kulleej maxalli ah waxa ayna helaan labadaba kiridhitka dugsigu sare iyo kan kulleejka.

Ardaydu waxa ay iskuulka kadhigtaan kulleejka.

Ardayda iyo qoysaska ayaa mas'uul ka ah buugaagta iyo khidmadaha marka laga reebo in ardayda ay u qalmaan Qadada Bilaashka ah ama Qiimaha Jaban. Ardaydu waxa ay qaadan doonaan laba waraaq oo natiijo, mid ka socota kulleejka iyo mid ka socota dugsigu sare. Kiridhityada kulleejka waxaa loo adeegsan doonaa sida ay u go'aansadaan kulleejka ama jaamacada qaadaneyso, si aad wixi su'aala ah ugula xiriirto xafiiska lataliyaha kulleejka. U tag lataliyaha iskuulkaaga si aad uga hesho wixi faahfaahino ah.

Waxyaabaha soo socdo waa waraaqo-shaqo si ay kaaga caawiyaan go'aaminta danahaaga xirfada shaqo iyo fursadaha dugsiga sare ee kadib ah ee kaa caawin doona inaad hesho shaqooyinkaas. Tani waxa ay sidoo kale kaa caawin doontaa inaad go'aamiso koorsooyinka aad rabto inaad qaadato inta lagu jiro dugsiga sare.

Xaashida Shaqada ee ku Habboonaanshaha Xirfada

Aynu soo aruurino xoogaa macluumaad ah si aan go'aanno uga gaarno xirfadaada shaqo iyo yoolalka waxbarasho ee dugsiga sare kadambeeya. Wixi macluumaad dheeraad ah ka hel Naviance.

Xirfada 1	Xirfada 2	Xirfada 3
Jagada Xirfada/Shaqada:	Jagada Xirfada/Shaqada:	Jagada Xirfada/Shaqada:
Tababar nooc ee ah ee dugsiga sare kadib ama waxbarashada ayaa loo baahan yahay?:	Tababar nooc ee ah ee dugsiga sare kadib ama waxbarashada ayaa loo baahan yahay?:	Tababar nooc ee ah ee dugsiga sare kadib ama waxbarashada ayaa loo baahan yahay?:
kharashka:	kharashka:	kharashka:
Mushaarka Heerka Galitaanka Sanadlaha ee Seattle:	Mushaarka Heerka Galitaanka Sanadlaha ee Seattle:	Mushaarka Heerka Galitaanka Sanadlaha ee Seattle:
Mushaarka lagu noolaan karo ee Sanadlaha ee Seattle: <small>(Mushaarka Saacadiiba X 37.5 saacadood toddobaadkiiba X 52 toddobaad sanadkiiba ee shaqada wakhtiga buuxa)</small>	Mushaarka lagu noolaan karo ee Sanadlaha ee Seattle: <small>(Mushaarka Saacadiiba X 37.5 saacadood toddobaadkiiba X 52 toddobaad sanadkiiba ee shaqada wakhtiga buuxa)</small>	Mushaarka lagu noolaan karo ee Sanadlaha ee Seattle: <small>(Mushaarka Saacadiiba X 37.5 saacadood toddobaadkiiba X 52 toddobaad sanadkiiba ee shaqada wakhtiga buuxa)</small>

Su'aalaha la Tixgeliyo

Maxaa muhiim kuu ah ee ku jira xirfad shaqo?

Xirfadaha shaqo ee aad fiirneyso miyey ku jiraan wax adiga muhiim kuu ah?

Haddii ay maya ay tahay, sidaas maku qanacsan tahay?

Ma isxilqaami kartaa ama ku dari kartaa danahaaga siyaabo kale?

Ma u aragtaa qiimaha tababarka inuu u qalmo mushaarka shaqada aad dooratay?

Haddii ay maya ay tahay, sidaas maku qanacsan tahay?

Xaashida Shaqada ee ku Habboonaanshaha Kulleejka

Maxaa ay yihiin waxyaabaha aad dareento inay aad ugu muhiimsan yihiin guushaada? Miyey kaalmada dhaqaale ee aad hesho dabooshaa dhammaan kharashaadka kulleejka? Wixi macluumaad dheeraad ah ka hel SuperMatch® ee Naviance dhexdiisa. Waxaad midan waxbadan uga hadli doontaa inta lagu jiro mid kamid ah casharadaada Qorshaha Dugsiga Sare iyo Wixi Kadambeeyo.

Kulleejka 1	Kulleejka 2	Kulleejka 3
Magaca (Kulleejka/Jaamacada):	Magaca (Kulleejka/Jaamacada):	Magaca (Kulleejka/Jaamacada):
Takhasusyada Ugu Weyn (Aan daneynayo):	Takhasusyada Ugu Weyn (Aan daneynayo):	Takhasusyada Ugu Weyn (Aan daneynayo):
Goobta (Caasimada/Magaalada ama Degmada/Baadiyaha):	Goobta (Caasimada/Magaalada ama Degmada/Baadiyaha):	Goobta (Caasimada/Magaalada ama Degmada/Baadiyaha):
Cabbirka (Arday Badan ama Arday Yar):	Cabbirka (Arday Badan ama Arday Yar):	Cabbirka (Arday Badan ama Arday Yar):
Gaar loo leeyahay ama Dawladeed:	Gaar loo leeyahay ama Dawladeed:	Gaar loo leeyahay ama Dawladeed:
Mid Diimeed ama Calmaani, Iskudhaf ama Aan Ahayn:	Mid Diimeed ama Calmaani, Iskudhaf ama Aan Ahayn:	Mid Diimeed ama Calmaani, Iskudhaf ama Aan Ahayn:
Guri Kambaaska dhexdiisa ama Kabaxsan Kambaaska:	Guri Kambaaska dhexdiisa ama Kabaxsan Kambaaska:	Guri Kambaaska dhexdiisa ama Kabaxsan Kambaaska:
Heerka Meeleynta Shaqada:	Heerka Meeleynta Shaqada:	Heerka Meeleynta Shaqada:
Wadarta Qiimaha:	Wadarta Qiimaha:	Wadarta Qiimaha:
Qaddarka Xirmada Gargaarka Maaliyadeed:	Qaddarka Xirmada Gargaarka Maaliyadeed:	Qaddarka Xirmada Gargaarka Maaliyadeed:

Koorsooyinka Dugsiga Dhexe ee loogu talagalay Kiridhitka Dugsiga Sare

Ardayda Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxa ay heli karaan kiridhitka dugsiga sare ee ah koorsooyinka dugsiga dhexe ee gaarka ah.

Fasalka qalain jabinaya 2024 iyo wixi ka dambeeyo, kiridhityada la helo inta ardaygu ku jiro fasalka toddobaad ama sideedaad waxaa lagu dari doonaa warqada natiijada dugsiga sare haddii aysan si kale u codsan ardayga iyo qoyska ardayga mooyee.

Ardayda ka qalin jabinaya fasalada kahor sanadka 2024, kiridhityada la helo inta ardaygu dhiganayey fasalka toddobaad ama sideedaad waxaa lagu dari doonaa warqada natiijada dugsiga sare marka ay codsadaan ardayga iyo qoyska ardayga.

Ardayda dhammeysay koorso kiridhit lagu qaadanayo oo dugsiga sare inta ay dhiganayeen dugsiga dhexe ee dugsi kale oo degmo waa inay keenaan warqada natiijada oo ka socota dugsiga degmada ee koorso laga qaatay si loogu tixgeliyo oggolaanshaha maamulaha dugsiga sare ee Dugsiyada Dadweynaha Seattle.

Kiridhitka Aqoonta Luuqadaha Adduunka

Ardayda Dugsiyada Dadweynaha Seattle waxaa lagu abaalmarin karaa kiridhitka luuqada adduunka iyaga oo ku dhisayo aqoonta luuqad aan Af-Ingiriisi ahayn. Qiimeyntu waxay la jaan qaadi doontaa Golaha Mareykanka ee tilmaamaha aqoonta Waxbaridda Luqadaha Dibadda (ACTFL) si loo hubiyo joogteynta luqadaha oo dhan.

Wixii macluumaad dheeraad ah, u tag lataliyaha iskuulkaaga ama bogga Qiimeynta Luqadaha Adduunka ka booqo www.seattleschools.org/world-languages

Xulashada Koorsoada Dugsiga Sare ee Onlaynka ah

Waxaa jira shan ikhtiyaar si ay ardayda u qaataan koorsooyinka onlaynka ah:

1. Iska Diiwaangeli Ikhtiyaarka Onlaynka ee Iskaashiga Waalidka Cascade.
2. Iska Diiwaangeli Akadeemiyada Intergency iyo qaadashada koorsooyinka onlaynka ah.
3. Iska Diiwaangeli mid ka mid ah Daraasadaha Hindida Mareykanka ee degmada oo dhan, Daraasadaha Dadka Madow, Daraasadaha Qowmiyaadka, ama bixinta koorsoada onlaynka ah ee Luqadda Adduunka.
4. Qaado koorsooyinka onlaynka ah ee dib u kabista kiridhitka adiga oo u mataya bixiyeyaasha dugsigaaga sare uu isticmaalayo.
5. Raac Siyaasada iyo Habraaca 2024 oo codso ikhtiyaarka qaadashada kiridhitka ka baxsan degmada.

Isku Xigitaanka Casharada Koorsoada ee Lagu Taliyey

Bogagga soo socdo waxa ay ka kooban yihiin isku xigxiga koorsoada lagu taliyay iyo xulashooyinka koorsoada qaarkood, diyaargarowga, ama tusaalooyinka laga heli karo aag kasta oo tacliinta ah oo loo baahan yahay.

Fadlan kala xiriir iskuulkaaga wixi su'aala oo ku saabsan qeexitaanada koorsooyinka lasoo qoray iyo inaad ogaato xulashooyinka gaarka ah ee iskuulkaaga sare uu bixiyo. Macluumaad muhiim ah oo dheeraad ah waxaa laga heli karaa agabka diiwaangelinta ee uu iskuul kasto soo saaro.

Si wadajir ah loo isticmaalo, tani waxa ay kaa caawin doontaa inaad nakhshadeyso qorshe waxbarasho oo buuxin doona shuruudaha qalin jabinta oo kaa caawin doona inuu kuu diyaariyo qorshayaashaada dugsiga sare ka dib ah. Qorshahani waxaa loola jeedaa in lagu bixiyo waayo-aragnimo waxbarasho oo macno leh, ku habboon, oo shakhsi ahaaneed ee dugsiga sare oo dhan.


Waxbarashada Xirfadda & Farsamada (CTE)



Isku Xiga Koorsada Lagu Taliyey iyo Diyaargarowga Fasalada 6-12

7 Diyaargarow oo CTE ah:


1. Farshaxanka, Naqshadeynta iyo Sawir-gacmeedka
2. Ganacsiga iyo Suuqgeynta
3. Cuno karinta iyo Soo dhaweynta
4. Waxbarashada iyo Adeegyada Aadanaha
5. Caafimaadka iyo Daawada
6. Ganacsiga xirfada leh
7. STEM



Af-Ingiriisiga Faniga Luuqada




Isku Xiga Koorsada Lagu Taliyey iyo Xulashooyinka Fasalada 6-12



Caafimaadka




Isku Xiga Lagu Taliyey ee Fasalada 6-12



Xisaabta




Isku Xiga Koorsada Lagu Taliyey iyo Xulashooyinka Fasalada 6-12



Barashada Jimicsiga Jirka




Isku Xiga Koorsada Lagu Taliyey iyo Xulashooyinka Fasalada 6-12






Isku Xiga Koorsada Lagu Taliyey ee Fasalada 6-12



Cilmiga Bulshada




Isku Xiga Koorsada Lagu Taliyey iyo Xulashooyinka Fasalada 6-12



Bandhiga Fanka iyo Farshaxanka



Isku Xiga Koorsada & Tusaalooyinka Fasalada 6-12



Tusaalooyinka:

Arday raba inuu raaco dhaqanka fan gaar ah (tusaale muusig):

- Fasalka 6aad: Hobolada Hordhaca
- Fasalka 7aad: Hobolada Dhexe
- Fasalka 8aad: Hobolada Bandhiga
- Fasalka 9aad: Hobolada Xargaha Kabanka
- Fasalka 10aad: Hobolada Bandhiga
- Fasalka 11aad: Hobolada Qalabka Muusiga
- Fasalka 12aad: Hobolada Kooxda ah


Ardayga raba inuu sahmiyo dhaqamada fanka oo badan:

- Fasalka 6aad: Bilowga Fanka Muuqda
- Fasalka 7aad: Khibrada Muusiga
- Fasalka 8aad: Bilowga Tiyaatarka
- Fasalka 9aad: Bilowga Sawirida & Riinjiyeynta
- Fasalka 10aad: Bilowga Tiyaatarka/Sare
- Fasalka 11aad: Laabka Gitaarka 1
- Fasalka 12aad: Bilowga Sawir Qaadista

Luuqadaha Adduunka



Isku Xiga Koorsada Lagu Taliyey ee Fasalada 6-12





Fursadaha Waxbarasho iyo Shaqo ee Loo Wada Siman Yahay: Dugsiyada Dadweynaha Seattle, SPS, waxa ay bixiyaan Fursadaha Waxbarasho ee loo Wada Siman Yahay iyo Fursadaha Shaqo ee loo Wada Siman Yahay mana ku kala takooro wax barnaamijyo ah ama hawlo ah oo ku saleysan jinsiga; isirka; caqiidada; midabka; diinta; abtiriska; wadanka uu kasoo jeedo qofka; da'da; xaalada dhaqaale; nooca rabitaanka galmada, oo ay kujirto muujinta ama aqoonsiga jinsiga; uurka; xaaladda guurka; muuqaalka jirka; jiritaanka wax naafonimo dareen, maskax ama jireed; ka saarida halyeey sharaf leh ama xaalad militari; ama adeegsiga hage eey tababaran ama xayawaanka caawinta adeegga. SPS waxa uu sidoo kale bixiyaa helitaanka loo siman yahay ee Boy Scouts iyo kooxaha kale ee loogu talagalay dhalinyarada.

SPS waxa uu u hoggaansamaa dhammaan shuruucda iyo qawaaniinta gobolka iyo federaalka, oo ay ku jiraan laakiin aanay ku koobneyn: Ciwaanka IX ee Wax ka Beddelka Waxbarashada ee 1972; Ciwaanka VI Xeerka Xuquuqda Rayidka 1964; Qeybta 504 ee Sharciga dhaqancelinta ee 1973; Xeerka Ameerikaanka Naafada ah (ADA) ee 1990 iyo Xeerka Wax ka Beddelka ADA ee 2008; iyo Sharciga Washington ee Ka Dhanka ah Takoorka RCW 49.60. U hoggaansanaanta SPS waxaa kamid ah, laakiin aanay ku koobneyn dhammaan barnaamijyada degmada, koorsooyinka, iyo nashaadaadka, oo ay ku jiraan nashaadaadyo manhajka ka baxsan, adeegyada, iyo gelitaanka xarumaha.